Nidaamka lacag Bixinta iyo siyaasada qidmada

14.A Xeer

14.A.1 Maal gelinta Adeegyada Caawimaada Dhalaanka

(a) Wakaaladaha Adeeg bixiyaha iyo Bixiyaasha Adeegga ee ESIT waa inay heerka ugu sareysa gaarsiiyaan adeegsiga ilaha maaliyada ee federaalka, gobalka, ama kuwa deegaanka, ayagoo helaaya dheefaha dadwaynaha, caymiska gaarka loo leeyahay, iyo qarashaadka qoyska (tusaale, qaybta qarashka, qaybta caymiska, lacagaha la jarto, iyo qarashaadka ka qaybgalka ee bil-laha ah) si ay u bixiyaan adeegyada caawimaada dhallaanka; iyo

(b) Adeegyada, qorshaha IFSP, oo lagu daboolaayo family cost participation (Ka qaybgalka Qarashka Qoyska, FCP), sida lagu qeexay 14.A.4, qoysaska ayaa laga doonayaa inay qayb baxshaan qarashka adeegyada. Tan waxaa ku jira adeegsiga midkood ama ka badan isha soo socota ee maal gelinta:

(1) Apple Health for Kids CHIP

(2) Medicaid

(3) TRICARE

(4) Caymiska Gaarka loo leeyahay

(5) Qarashka Ka Qaybgalka Bilaha ah

Lacagaha Qaybta C ee IDEA ama lacagaha kale ee gobalka ayaa loo adeegsan karaa bixinta qarashaadka sida qaybta qarashka, caymiska wadaaga ah, iyo lacagaha caymisku jarto sida ku cad 34 CFR 303.521(a)(6).

14.A.2 Waajibaadka Wakaaladda Adeeg Bixiyaha ESIT

(a) Wakaaladdaha Adeeg Bixiyaha ESIT waa inay:

(1) Sida ku xusan 34 CFR §303.520(a)(2)(i), xaqiijiyaan in qoysaska aan lagu qasbin inay iska diiwaan gashaan Apple Health for Kids CHIP ama Medicaid, ayadoo shardi u ah in ilmuhu helo adeegyada.

(2) Waa inay helaan ogolaanshaha waalidka ee adeegsiga dheefaha dawlada ee qoyska ayna ku jiraan TRICARE, iyo, sida kucad 34 CFR §303.520(b)(1)(i), waa inay adeegsadaan caymiska gaarka loo leeyahay ee qoyska si ay ugu baxshaan qarashka:

(i) Qiimeynada iyo Baaritaannada **(ayadoo aan loo eegayn ogolaanshaha wax qarashaad ah lagama qaadi karo qoysaska)**;

(ii) Adeegyada Caawimaada Dhallaanka; iyo

(iii) Koror kasta oo lagu sameeyo inta jeer, mudada, intay soconayso, ama heerka adeegyada.

Kalaxidhiidh:

The Washington State Department of Children, Youth & Families
Early Support for Infants and Toddlers Program
P.O. Box 40970
Olympia, WA 98504-0970
Toll-free: 1-866-482-4325
www.dcyf.wa.gov

*Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*

DCYF PUBLICATION FS_0033 | DEL 11-019 SM (10-2025) Somali

(3) Sida ku xusan 34 CFR §303.520(a)(3) iyo 303.520(b)(1)(iii), xaqiiji in dhammaan qoysasku helaan nuqulka qoran ama elektarooniga ah ee Nidaamka Lacagaha ee ESIT iyo Xeerka arashka, kaas oo ay ku jiraan xuquuqda waalidiinta iyo difaacyada habraaca marka dheefaha dawlada, Tricare, iyo/ama caymiska gaarka loo leeyahay ee qoyska la adeegsado.

(4) Markay helaan ogolaansho, waxay qarashka ka codsan karaan dheefaha dawlada, TRICARE, iyo/ama caymiska gaarka loo leeyahay ee qoyska si loogu baxsho adeegyada ku jira FCP sida lagu qeexay 14.A.4.

(5) Waa inay go'aanshaan "Awooda Dhiibista Qarashka", ilaa in uu meesha ka saaray maahee qoysku, sida lagu qeexay 14.B.3 dhammaan qoysaska haysta TRICARE, caymiska gaarka loo leeyahay, ama aan haysan wax caymis ah.

(6) Waa inay xaqiijiyaan in qoysaska la go'aanshay inay yihiin "Kuwo aan Awoodin Inay Qarashka Baxshaan" sida lagu 14.B.4 ay adeegyada ku helaan bilaash.

(7) Waa inay ansixiyaan shardi dhaafka danyarta, sida lagu qeexay 14.B.11, ee qoys kasta oo la go'aanshay inuu yahay "Kuwo Aan Awoodin Inay Qarashka Baxshaan" oo muujiyay in aysan awoodin buuxinta masuuliyadda qoondada qarashka ee qoyskooda.

(8) Waa inay qoysaska ka dalbadaan qarashka qaybta ah, qaybta caymiska, iyo lacagaha la jarto, ee adeegyada ku jira FCP sida lagu qeexay 14.A.4.

(9) Waa inay qoysaska ka dalbadaan qarashka bilaha ah ee ka qaybgalkooda, marka loo xilsaaro

(10) Dhammaan **adeegyada** ku qoran qorshaha IFSP ee ardayda ee waafaqsan FCP, sida lagu qeexay 14.A.4, waa inay xaqiijiyaan in qoysasku keliya dhiibaan midkood:

(i) Qaybta qarashka, qaybta caymiska, iyo/ama lacagaha la goosto; ama

(ii) Qoondada qarashka ka qaybgalka ee bilaha ah.

(11) Haddii loogu baahdo kahortaga dib u dhaca siinta adeegyada wakhtigii loogu talo galay ilmaha ama qoyska ilmaha, Wakaalada Bixiyaha ee ESIT ayaa adeegsan karta lacagaha Qaybta C ee IDEA si ay ugu bixiso qarashka adeegyada ku jira FCP sida lagu qeexay 14.A.4, magdhawga wali laga sugaayo wakaallada ama shirkadda leh masuuliyadda kama danbaysta ah ee qarashka. Lacagaha Qaybta C ee IDEA ayaa la waafajinayaa hanaanka Qarash Bixiyaha Kadib marka Cid Kale la waayo sida ku cad 34 CFR 303.510(a) iyo (b) iyo 303.203(b)(1), eeg xeerka 15.A.

14.A.3 Adeegyada Qarashkooda ay Bixisay Dawladu

(a) Sida ku cad 34 CFR §303.521(b) (2011), adeegyada soo socda waa inay lacagta dawlada ku bixiyaan Wakaaladaha Bixiyaha iyo Adeeg Bixiyaasha ESIT kuwaas oo aan **wax qarash ah laga qaadi karin qoysaska**:

(1) Dhaqan gelinta shuruudaha helitaanka ilmaha ee ku qoran §§303.301 ilaa 303.303;

(2) Qiimeynta hore iyo hubinta joogtada ah, iyadoo la raacayo §303.320, iyo howlaha la xiriira qiimeynta iyo hubinta ee §303.13(b).

(i) Marka qoysku ogolaado, dheefaha dawlada, TRICARE, iyo caymiska gaarka loo leeyahay ayaa laga dalban karaa qarashka qiimeynada hore iyo qiimeynada joogtada ah.

(3) Isku duwida Adeegyada (Iskuduwida Agabyada Qoysaska), sida lagu qeexay §§303.13(b) (11) iyo 303.34;

(4) Howlaha maamulka iyo isuduwidda ee la xiriira:

(i) Horumarinta, dib u eegista, iyo qiimeynta IFSPs iyo kumeelgaarka IFSPs iyadoo la raacayo §§303.342 illaa 303.345; iyo

(ii) Hirgelinta Qayb E, Ilaalinta Nidaamka, iyo qaybaha kale ee nidaamka gobolka ee adeegyada waxkaqabashada dhallaanka ee Qayb-hoosaadka D ee 34 CFR Qaybta 303.

14.A.4 Adeegyada Caawimaadda Dhallaanka ee lagu bixinaayo Qarashka Wadaagga ah ee Qoyska

(a) Si ku cad 34 CFR §303.521(b), adeegyada soo socda, **ayna ku jiraan laakiin kuma koobna**, adeegyada caafimaadka ee qarashkooda laga dalban karo dheefaha dawlada, TRICARE, ama caymiska gaarka loo leeyahay, ayaa la waafajinayaa FCP:

(1) Aaladda iyo Adeegyada Caawinta Tikniyojiyada

(2) Adeegyada Maqalka

(3) Tababarka Qoyska, Tallo bixinta, iyo Booqashooyinka Guriga

(4) Adeegyada Daryeelka cafimaadka

(5) Adeegyada Caafimaadka

(6) Adeegyada kalkaalinta

(7) Adeegyada Nafaqada

(8) Shaqada daaweeynta jirka

(9) Daaweynta jirka

(10) Adeegyada Cilmi-nafsiga

(11) Luuqadda Dhagoolka iyo Luuqadda Ishaaradda

(12) Cashar Gaar ah

(13) Adeegyada Barashada Luqadda-Hadalka

(14) Adeegyada Shaqada Bulshada

(15) Gaadiidka iyo qarashaadka la xiriira

(16) Adeegyada Aragga

(b) Xaqiijin: Sida ku cad 34 CFR §303.521 (a) (4)(iii), qoysaska ayaan laga qaadi doonin wax ka badan qarashka dhabta ah ee adeegyada waafaqsan FCP.

(c) Qarashkaadka ayaan looga qaadi doonin qoysaska adeegyada ilmuhu si kastaba xaqa u lahaa inuu si bilaash ah ku helo sida ku cad 14.A.3.

14.B Habraacyada

14.B.1 Foomka SOPAF

(a) Foomka SOPAF waa in:

(1) Loo buuxiyaa dhammaan qoysaska ayadoo aan loo eegayn nooca caymiska ama caymis la'aanta

(2) Waa inuu saxiixaa qofka caymiska leh ama waalidka/masuulka.

(3) Waa in la buuxiyaa sanad kasta si loo xaqiijiyo caymiska iyo awooda bixinta qarashka.

(4) Waa in la buuxiyaa xili hore marka ay dhacaan waxyaabaha soo socda:

(i) Isbadellada caymiska qoyska, sida inay ka guuraan dheefaha dawlada una guuraan caymiska gaarka loo leeyahay ama ay ka guuraan caymis la'aan oo u guuraan caymiska dawlada ama caymiska gaarka loo leeyahay;

(ii) Qoys uu haysto caymiska TRICARE ama caymiska gaarka loo leeyahay uuna jiro koror ku yimid inta jeer, muddada, inta ay soconayso, ama heerka adeegyada IFSP ee ku cad FCP;

(iii) Isbadel uu ku dhaco tirada qoyska, iyo dakhliga sanadka iyo xogta qarashaadka;

(iv) Qoysku codsado shardi dhaafka danyarta;

(v) Isbadellada waalidka/masuulka ilmaha; ama

(vi) Marka IFSP-gii hore uusan lahayn adeegyada ku cad FCP oo adeeg waafaqsan FCP lagu daro IFSP.

14.B.2 Awoodda iyo Awoodid La'aanta Bixinta Qarashka

(a) Ilaa inuu cafiyo maahee qoysku, "Aooda Bixinta Qarashka" waa in la go'aanshaa ayadoo la adeegsanaayo foomka SOPAF ee qpysaska ay ku baxaan qarashaadka la xiriira adeegyada ku qoran IFSP ee waafaqsan FPC, sida lagu qeexay 14.A.4.

(b) Awoodda iyo Awoodid La'aanta Bixinta qarashka waxaa lagu jaangoyaa:

(1) Tirada dadka qoyska, iyo

(2) Dakhliga lagu dabaqaayo qarashaadka la ogol yahay.

(c) Cadeynta dakhliga ee labo iyo tobankii bilood ee lasoo dhaafay waa in la eegaa laakiin waa in aysan diiwaanka ku hayn Wakaalada Bixiyaha ee ESIT. Dukumiintiga waxaa ku jiri kara:

(1) Foomka canshuurta ee IRS 1040 ama,

(2) Nuqulkii ugu danbeeyay ee foomka W2(s) iyo/ama 1099(s),

(3) Risiidkii ugu danbeeyay ee mushaarka, ama

(4) Bayaanka qoran ama hadalka ah ee dakhliga oo kasoo baxay qoyska.

(d) Cadeynta qarashaadka la ogol yahay ee aan lasoo magi karin ayna ku jiraan qarashaadka soo socda ee ku baxay ilmaha iyo/ama xubnaha kale qoyska intii lagu jiray labo iyo tobankii bilood ee lasoo dhaafay:

(1) Kharashaadka caafimaadka iyo ilkaha oo ay ku jiraan khidmadaha caymiska, lacagta laga jaro, lacagta la isla bixiyo, iyo caymiska la wadaago

(2) Daaweynta caafimaadka dhimirka ee aan caymiska kujirin

(3) Daryeelka caafimaadka guriga oo ay bixiso hay'ad caafimaad oo shati leh

(4) Masruufka carruurta / lacagta lasiiyo xaaska lafuray

(5) Kharashaadka xanaanada carruurta ee lagalay xiliga waalidku (waalidiintu) ay shaqeynayeen ama dugsiga aadayeen.

14.B.3 Shuruudaha Awooda BIXINTA qarashka

(a) Awooda Bixinta Qarashka waa marka wadarta guud ee dakhliga sanadkii ee qoysku ku siman yahay ama ka sareeyo 200% Federal Poverty Level (Heerka Fakhriga ee Federaalka, FPL).

(b) Ilaa in uu meesha ka saaray maahee qoysku, "Awooda Bixinta Qarashka" waa in la go'aanshaa marka qoysku:

(1) Diidey adeegsiga Apple Health for Kids CHIP, TRICARE, iyo/ama caymiska gaarka loo leeyahay; ama

(2) Uusan haysan wax caymis ah.

(c) Qoysaska la go'aansho inay awoodaan bixinta qarashka ayaa masuul ka noqon doona qaybta qarashka, qaybta caymiska, ama qarashka qoondada bil-laha ah. Qoysaska ayaa la siin doonaa dookha:

(1) Bixinta qaybtooda qarashka, caymiska, iyo lacagaha laga jaraayo, ama

(2) Inay diidaan adeegsiga caymiskooda oo ay dhiibaan qoondada ka qaybgalka ee bil-laha ah, ama

(3) Codsadaan shardi dhaafka danyarta.

(d) Haddii qoysku diido inuu bixiyo xogta muhiimka ah ee dakhliga iyo qarashka, wuxuu masuul ka noqon doonaa bixinta qaybtiisa qarashka, caymiska, iyo lacagaha la jarto ama khidmada ka qaybgalka bil-laha ah ee heerka ugu sareeya ee laga qaadaayo tirada qoyskooda.

14.B.4 Shuruudaha Awood La'aanta Bixinta qarashka

(a) Awood la'aanta Bixinta Qarashka waa marka wadarta guud ee dakhliga sanadkii ee qoysku ku siman yahay ama ka hoosayso 200% Federal Poverty Level (Heerka Fakhriga ee Federaalka, FPL).

(b) Qoysaska la go'aansho "inaysan Awoodin Bixinta Qarashka" **ayaan masuul ka noqon doonin** qaybta qarashka, qaybta caymiska, lacagaha caymisku jarto, ama qarashka qoondada bil-laha ah. Tan waxaa ku jira qoysaska aan haysan wax caymis ah, TRICARE, ama caymiska gaarka loo leeyahay.

(c) Xaqiijinta: Sida ku cad 34 CFR §303.521(a)(4) (ii), haddii qoys uu buuxiyo qeexitaanka "Aan Awoodin Bixinta Qarashka", dhammaan adeegyada lagu baxsho FCP waxaa lagu bixin doonaa lacag la'aan. Intaa waxa u dheer, awood la'aanta qoysku in ay bixiso lacag ma keenayso dib u dhac ama in la diido adeegyada.

(d) Lacagaha IDEA Qaybta C ama lacagaha kale ee gobalka ayaa loo adeegsan karaa bixinta qarashaadka sida qaybta qarashka, caymiska wadaaga ah, iyo lacagaha caymisku jarto sida ku cad 34 CFR 303.521(a)(6).

14.B.5 Adeegsig dheefaha dawlada (Apple Health for Kids CHIP iyo Medicaid)

(a) Qoysaska hela dheefaha dawlada ayaa adeegyada ku heli doona lacag la'aan.

(b) Wakaaladdaha Adeeg Bixiyaha iyo Bixiyaasha Adeegga ee ESIT waa inay:

(1) Sida ku cad 34 CFR §§303.414 iyo 303.520(a)(3)(i), waxeey siinayaan ogeysiis qoraal ah qoysaska ka diiwaangashan dheefaha dawlada iyaga oo ogeysiinaya in macluumaadka shaqsiga lagu garan karo loo sheegi doono Apple Health for Kids CHIP ama Medicaid sababtuna waa in lagusoo dalaco biilka;

(2) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520(a)(3)(iii), u sheegaya qoysaska in ay xaq u leeyihiin in ay ka laabtaan oggolaanshahooda siidaynta macluumaadka shakhsiga lagu garan karo ee loo isticmaalaya kudalicista biilka waqti kasta.

(c) Wakaaladaha Bixiyaha iyo Adeeg Bixiyaasha ESIT ayaan bixin doonin qarashka joogtada ah ee Apple Health for Kids CHIP.

(d) Sida ku cad 34 CFR §303.520(a)(2)(iii), Wakaaladaha Bixiyaha iyo Adeeg Bixiyaasha ESIT waa inay bixiyaan adeegyada la isku raacay ee ku qoran IFSP, oo waafaqsan FCP, sida lagu qeexay 14.A.4. La'aanta ogolaanshaha isticmaalka dheefaha dawlada ayaan loo adeegsan karin dib u dhigista ama diidista adeegyo kasta oo ku qoran IFSP lana siin lahaa ilmaha ama qoyska.

(e) Sida ku cad 34 CFR §303.521 (a) (4) (iv), qoysaska leh ceymiska dadweynaha ama dheefaha laguma soodalici doono in kabadan qoysaska aan lahayn ceymiska dadweynaha ama dheefaha ama caymiska gaarka loo leeyahay.

14.B.6 Adeegsiga caymiska TRICARE iyo/ama Caymiska Gaarka ah loo Leeyahay

(a) Iyada oo la raacayo 34 CFR §303.520(b)(1)(ii), Wakaaladaha Bixiyaha iyo Adeeg Bixiyaasha ESIT ayaa siin doona bayaan qoran oo kusaabsan qaybaha guud ee kharashaadka qoysku geli karaan oo ka dhalan kara isticmaalka TRICARE ama caymiska gaarka loo leeyahay, sida:

(1) Isla-bixinta lacagta, wadajirka caymiska, ama lacagaha kale ee laga jaro ama kharashyo kale oo muddada dheer ah, sida dhuminta dheefta sababta oo ah waxaa lajoojiyay caymiska daryeelka caafimaadka ee sanadlaha ama nolosha dhan / caymiska ee hoos yimaadda sharciga caymiska ee ilmaha, waalidka, ama ilmaha xubnaha qoyska;

(2) Suurtagalnimada ah in adeegsiga TRICARE ama caymiska gaarka ah ee qoyska ay si xun u saameyn karto helitaanka caymiska caafimaadka ilmaha naafada ah, waalidka, ama xubnaha qoyska cunugga ee hoos imanaya sharciga. iyo caymiska daryeelka caafimaad / caymiska waa la joojin karaa sababtuna tahay adeegsiga sharciyada caymiska si loogu bixiyo adeegyada Qaybta C ee IDEA; ama

(3) Suuragalnimada ah in caymiska daryeelka caafimaad / lacagta caymiska laga yaabo inay saameyso isticmaalka TRICARE ama caymiska gaarka loo leeyahay si loogu bixiyo qarashka adeegyada.

(4) Suuragalnimada ah in qoysku bixin karo qarashka adeegyada haddii kale lagu dabooli lahaa TRICARE ama caymiska gaarka loo leeyahay.

(5) Khatar keeni karta luminta u qalmitaanka ilmaha ama waalidka ilmaha ee qarashad dhaafyada guriga iyo kuwa bulshada ku saleysan ayadoo lagu saleynaayo qarashaadka guud ee caafimaadka la xiriira.

(b) Qoysaska la go'aanshay in ay leeyihiin "Awooda Bixinta Qarashka" ayaa masuul ka noqon doona bixinta qarashaadka qaybta ah, qaybta caymiska, iyo lacagaha la jarto, ilaa in shardi dhaafka danyarta la ansixiyo maahee.

(c) Wakaaladaha Bixiyaha iyo Adeeg Bixiyaasha ESIT ayaan bixin doonin qarashka joogtada ah ee dabooliska/caymiska caafimaadka.

(d) Sida ku cad §303.520(c), haddii qoys la go'aansho inuu in "Uusan Awoodin Bixinta Qashka" uusana ogolaan adeegsiga caymiskiisa TRICARE ama caymiska gaarka loo leeyahay, diidmadiisa ogolaanshaha ayaan loo adeegsan karin daahinta ama diidmada adeegyada lagu baxsho IDEA Qaybta C ee la siin lahaa ilmaha ama qoyska.

(e) Xaqiijin: Sida ku cad 34 CFR §303.521(a)(4)(iv), qoysaska leh ceymiska dadweynaha ama dheefaha laguma soodalici doono si indho ka cabir ah in kabadan qoysaska aan lahayn ceymiska dadweynaha ama dheefaha ama caymiska gaarka loo leeyahay.

14.B.7 Adeegsig dheefaha dawlada (Apple Health for Kids CHIP/Medicaid) iyo TRICARE iyo/ama Caymiska Gaarka loo leeyahay

(a) Si waafaqsan 34 CFR §303.520(b)(1), marka qoysasku ay haystaan labadaba dheefaha dawlada iyo caymiska gaarka loo leeyahay, ayna ku jiraan TRICARE, Wakaalladaha Bixiyaha iyo Bixiyaasha Adeegyada ESIT ayaa heli doona ogolaanshaha waalidka ee:

(1) Adeegsiga caymiska TRICARE ama caymiska gaarka loo leeyahay ee qoyska si loo dhiibo qarashka qiimeynta hore ama qiimeynta joogtada ah ee u qalmidda.

(i) Caymiska ayaa laga dalban karaa qarashka laakiin oyska ayaan masuul ka noqonayn wax kamid ah qarashaadka qaybta ah, qaybta caymiska, ama lacagaha caymisku jarto

(2) Adeegsiga caymiska TRICARE ama caymiska gaarka loo leeyahay ee qoyska si loo dhiibo qarashka adeegyada waafaqsan FCP sida lagu qeexay 14.A.4; iyo

(3) Adeegsiga caymiska TRICARE ama caymiska gaarka loo leeyahay ee qoyska si loo dhiibo qarashka kordhinta inta jeer, mudada, inta ay soconayso, ama heerka adeegyada waafaqsan FCP, sida lagu qeexay 14.A.4.

14.B.8 Qarashka Ka Qaybgalka Bilaha ah

(a) Sida ku cad 34 CFR §303.521, qoysaska la go'aansho inay leeyihiin "Awooda Bixinta Qarashka" ayaa bixin doona khidmada ka qaybgalka bilaha ah marka qoysku:

(1) Uusan haysan wax caymis ah; ama

(2) Diido adeegsiga Tricare ama caymiska gaarka ah loo leeyahay

(b) Qoondada Qarashka ka Qaybgalka ee Bilaha ah:

(1) Waxaa lagu saleeyaa tirada qoyska;

(2) Waxaa lagu go'aanshaa adeegsiga Jadwalka Khidmada Bilaha ah (oo sanad kasta dib loo eego ayadoo la adeegsanaayo Tilmaamaha Federal Poverty Level (Heerka Fakhriga ee Federaalka, FPL));

(3) Waxaa la cusbooneysiiyaa sanad kasta ama kahor haddii uu jiro isbadel ku dhacay tirada qoyska, dakhliga, ama qarashaadka;

(4) Khidmad go'an **dhammaan** adeegyada ku qoran IFSP ee waafaqsan FCP, sida lagu qeexay 14.A.4;

(5) Cadadka ugu badan ee la qaado ayadoo aan la eegayn tirada carruurta qoyska ee ka diiwaan gashan adeegyada; iyo

(6) Kama badan karto qiimaha rasmiga ah ee adeegyada.

(c) Qoysasku waxay weydiisan karaan ineey yeshaan dib-u-go'aaminta khidmaddooda qaybgalka ee bil kasta mar kastoo isbadal ku yimaado tirada qoyska, dakhliga iyo / ama kharashaadka.

(d) Qoysaska diida inay baxshaan xogta dakhliga iyo qarashaadka ayaa laga qaadi doonaa khidmada ka qaybgalka ee bilaha ah oo ku siman heerka ugu sareeya ayadoo loo eegaayo tirada qoyska.

14.B.9 Diidmooyinka Caymiska, La'aanta Dheefaha, iyo Dhammaadka Dheefaha

(a) Marka TRICARE, ama caymiska gaarka loo leeyahay **daboolo qaar laakiin uusan wada daboolin dhammaan adeegyada** waafaqsan FCP, sida lagu qeexay 14.A.4, gudaha qorshah IFSP:

(1) Dedaal kasta ayaa la samayn doonaa laguna qori doonaa diiwaanka ilmaha, si loo helo ogolaanshaha caymiska.

(2) Adeegyada aan la daboolin waa in bilaash lagu siiyaa qoyska.

(b) Marka TRICARE, ama caymiska gaarka loo leeyahay **uusan daboolin wax kamid ah adeegyada** waafaqsan FCP, sida lagu qeexay 14.A.4, gudaha qorshah IFSP:

(1) Khidmadda ka qaybgalka bilaha ah ayaa laga doonayaa haddii qoyska la go'aansho inuu leeyahay "Awoodda Bixinta Qarashka" oo shardi dhaafka danyarta aan la ansixin.

(c) Marka dheefaha TRICARE caymiska gaarka loo leeyahay **ay dhamaadeen** dhammaan adeegyada ku qoran IFSP oo waafaqsan FCP, sida lagu qeexay 14.A.4, adeegyada waxaa lagu bixin doonaa lacag la'aan.

14.B.10 Lacagaha Khiyaannada

(a) Qoysaska la go'aanshay inay leeyihiin "Awooda Bixinta Qarashka" oo lagu leeyahay lacago aysan bixin oo u dhigma mudada qaan sheegta 90 maalmood taagnaa, Wakaallada Bixiyaha ESIT waa in:

(1) Ay uruurisaa xogta dakhliga iyo qarashka si dib loogu go'aansho "Awooda Bixinta Qarashka" ee qoyska, haddii aan lagu go'aamin sanadkii lasoo dhaafay dhexdiisa, ama haddii isbadel ku dhacay tirada, dakhliga, ama qarashaadka qoyska.

(b) Haddii qoyska dib loo go'aansho in "Uusan Awoodin Bixinta Qarashka", qoyska ayaan masuul ka noqon doonin wax kamid ah qaybaha qarashka, qaybta caymiska, lacagaha la jarto, ama khidmadaha ka qaybgalka bilaha ah mustaqbalka.

(c) Haddii qoyska dib loo go'aansho inuu "Awoodo Bixinta Qarashka" uuna adeeyo in uusan buuxin karin masuuliyadda qoondada qarashka ee qoyskooda, shardi dhaafka danyarta waa in la ansixiyaa.

(d) Haddii qoysku diido inuu keeno xogta dakhliga iyo qarashka:

(1) Qoyska ayaa masuul ka noqon doona lacag kasta oo aan la dhiibin iyo qaybaha qarashka, caymiska, lacagaha la jarto, ama qoondada khidmada bilaha ah ee mustaqbalka; iyo

(2) Dedaal kasta oo macquul ah ayaa la samayn doonaa lana qori doonaa si looga fogaado u dirista qoysaska wakaaladaha daynta uruuriya ayadoo la abuuri doono qorshaha lacag bixinta oo ay isku raaceen qoyska iyo Wakaallada Bixiyaha ee ESIT.

(e) Adeegyada waafaqsan FCP, sida lagu qeexay 14.A.4, ee ku jira qorshaha IFSP ayaan la hakin karin sabab la xiriirta in lacagta la bixin waayay.

(f) Wakaalada Bixiyaha ESIT waa inay leedahay habraacyada sugan iyo nidaamyada lagu xalinaayo uruurinta lacagaha la bixin waayay oo lagu dhaqan gelinaayo si loo siman yahay dhammaan qoysaska.

14.B.11 Shardi Dhaafka Danyarta

(a) Shardi dhaafka danyarta waa in la ansixiyaa marka:

(1) Qoys keenay xogta dakhligooda iyo qarashkooda lana go'aanshay inay "Awoodaan Bixinta Qarashka" ayaa sheegay in uusan buuxin karin masuuliyadda lacagta khidmada bilaha ah sabab la xiriirta xaalad jirta, **oo ay ku jiraan laakiin kuma koobna waxyaabaha soo socda**:

(i) Isbadelka dakhliga ama qarashaadka la ogol yahay

(ii) Qarash kasta oo wayn iyo/ama joogto ah oo caafimaad.

(iii) Isbadel ku dhacay xaalada shaqada (tusaale, luminta shaqada ama saacadaha la dhimay).

(iv) Dhacdo wayn oo dhanka nolosha ah (tusaale, furiin xiriir burburay, dhaawac xanuun, ama geerida ku dhacday qoyska).

(v) Xaalad degdeg ah ama masiibo dabiici ah.

(vi) Lacagaha kirada ama daynta guriga, oo leh qarashaadka bilaha ah, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna tasiilaadka ka baxsan taleefanka, oo ka badan 30% dakhliga bishii ee qoyska.

(b) Cadeynta saxiixan ee danyarta ee qoysaska oo ku jirta foomka SOPAF ayaa ku filan, looma baahna dukumiinti kale.

(c) Caymiska ayaa laga dalban karaa qarashka marka waalidku ogolaado; laakiin qoyska ayaan masuul ka noqonayn wax kamid ah qarashaadka qaybta ah, qaybta caymiska, ama lacagaha caymisku jarto.

(d) Marka ay ka wareegayaa hal Wakaalada Bixiyaa ESIT una wareegayaan mid kale, "AAwooda Bixinta Qarashka" iyo cadeynta danyarnimada ayaa la wareegaaya qoyska.

(e) Ilaa in isbadel ku dhacay maahee xaalada qoyska, shardi dhaafyada danyarta waa in dib loo eegaa ugu yaraan sanad kasta.

(f) Wakaaladaha Bixiyaha ESIT ayaa adeegsan kara lacagaha kale ee wakaalada, ayna ku jirto lacagaha bixiyaha ugu danbeeya ee Qaybta C, si loogu daboolo qaybaha qarashka, caymiska, lacagaha la jarto, ama khidmadaha ka qaybgalka bilaha ah.

14.B.12 Difaacyada Habraaca

(a) Sida ku cad 34 CFR §303.521(e)(1), qoysaska ayaa xaq u leh inay diidaan amarka khidmada, ama go'aaminta "Awooda Bixinta Qarashka" ayagoo:

(1) Ka qaybgalaaya dhexdhexaadinta sida ku cad 34 CFR §303.431;

(2) Codsanaaya dacwad dhageysi hoos imaanaysa 334 CFR §303.436 ama §303.441, mid kastoo ku habboon;

(3) Xareeysaanaya cabashashada gobolka sida ku xusan 34 CFR §303.434; iyo/ama

(4) Adeegsanaaya qaab kasto kale oo uu dejiyay gobolku si loo dedejiyo xallinta sheegashada maaliyadeed.

(b) Sida ku cad 34 CFR §303.520(b)(1)(iii) iyo §303.521(e)(2), qoysaska waa in la siiyaa nuulka qoran ama elektarooniga ah ee Xeerka Nidaamka Lacag Bixinta iyo Khidmadaha oo faahfahinaaya difaacyadooda habraaca marka:

(1) Barnaamijku bilaabo adeegyada IFSP; iyo

(2) Koror ku yimaado adeegyada IFSP

14.C Agabka la Xiriira

Waxaa laga heli karaa webseedka ESIT ee DCYF:
www.dcyf.wa.gov/services/child-dev-support-providers/esit/forms-publications

(a) Tilmaamaha ka Qaybgalka Qarashka Qoyska

(b) Foomka SOPAF

(c) Jadwalka Qarashka Ka Qaybgalka Bilaha ah

14.D Qeexitaanada

(a) Qarashka Dawladu dhiibayso waxaa laga wadaa qarashka hawlaha IDEA Qaybta C iyo adeegyada loo baahan yahay inay qarashkooda dhiibto ayna ku siiso wakaalada dawladu shaqsiga ama qoyska helaaya adeegga.

(b) Dheefaha dawlada waxaa laga wadaa barnaamijyada kaalmada dawlada sida Apple Health for Kids CHIP iyo Medicaid.

(c) TRICARE waxaa aga wadaa barnaamijka daryeelka caafimaadka ee dawlada oo ay bixiso U.S. Department of Defense (Waaxda Difaaca ee Mareykanka) lana siiyo saraakiisha shaqeysa iyo kuwa hawlgabka ah ee milatariga, ilmahooda iyo qaarkood xubnaha Ilaallada Qaranka iyo Kaydka. Lacagaha qaybta qarashka, caymiska, iyo lacagaha la jarto ayaa laga qaadi karaa adeegyada ku jira IFSP ee waafaqsan ka qaybgalka qarashka qoyska.

(d) Caymiska gaarka loo leeyahay waxaa laga wadaa caymis aan ahayn dheefaha dawlada iyo TRICARE, kaas oo qaybaha lacagta, caymiska, iyo lacagaha la jarto lagu dabaqo adeegyada IFSP oo waafaqsan ka qaybgalka qarashka qoyska. Tan waxaa ku jira qorsheyaasha caymiska lacagaha badan jarta.

(e) Qaataha caymiska waxaa laga wadaa qofka ama wakaalada heshiiska kula jirta shirkadda caymiska, taas oo laga yaabo inay bixiso lacagaha joogtada ah, wuxuuna xaq u leeyahay inuu helo dheefaha caymiska sida lagu sheegay xeerka.

(f) Ka qaybgalka Qarashka Qoyska waxaa laga wadaa adeegyada ku jira IFSP ee waafaqsan ka qaybgalka qarashka qoyska oo qoyska ay qasab tahay inuu dhaqaale ahaan door ka qaato asagoo adeegsanaaya dheefaha dawlada, Tricare, caymiska gaarka loo leeyahay, iyo/ama bixinaaya khidmada qoondada bishii.

(g) Khidmada Ka Qaybgalka Bishii waxaa laga wadaa qiimaha khidmada go'an ee bishii ee laga qaado qoyska ayadoo lagu saleeyo xogta tirada, dakhliga, iyo qarashaadka qoyska.

(h) Wakaalada Bixiyaha ESIT waxaa laga wadaa urur kasta oo ay DCYF ogolaatay ayna ku jiraan laakiin kuma koobna shirkad dawladeed, gaar loo leeyahay, qabiil, ama khayri ah oo ay ku jirto Degmo Dugsiyeed, oo bixisa dhammaan Adeegyada Caawimaada Dhalaanka ayna ku jiraan Isku Dubaridka Khayraadka Qoyska sida ku cad Heshiiska Wakaalada Bixiyaha ESIT kala dhexeeya DCYF, Qaybta C ee IDEA, Qorshaha Gobalka Washington ee federaalku Ogolaaday ayadoo aan loo eegayn haddii wakaaladu hesho lacagaha dawlada federaalka ee lagu baxsho Qaybta C ee IDEA (Loo qoray inay tahay EISPA gudaha WAC 110-140).

(i) Adeegyada Caawimaada Dhalaanka ama Adeegyada waxaa laga wadaa adeegyada caawimaada tooska ah, sida lagu qeexay Qaybta C ee IDEA, iyo Xeerarka Gobalka Washington iyo Habraacyada, Qeexitaannada Xeerka 2. (Qaybta 303.13 Adeegyada caawimaada dhalaanka - Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah) oo ku jira IFSP ga imaha ayaa la waafajin doonaa ka qaybgalka qarashka qoyska.

(j) Bixiyaha Adeegga ESIT waxaa laga wadaa qof, oo midkood ah shaqaalaha ama qandaraaslaha hoose, kaas oo bixiya Adeegyada Taageerada Dhallaanka, sida ku cad heshiiska Wakaalada Bixiyaha ESIT ay la leedahay DCYF, Qaybta C ee IDEA, iyo Qorshaha Gobalka Washington ee Federaalku Ogolaaday ayadoo aan loo eegayn in wakaalada ama qofku helo lacagaha federaalka ee Qaybta C ee IDEA.